WOMEN'S REFUGEE COMMISSION
RESEARCH. RETHINK. RESOLVE.



# Xogta Kooban ee Adeeg Bixiyaasha Bulshada

## Cidda aan nahay

Gudigga Qaxootiga Haweenku (WRC) wuxuu kor u qaadayaa nolosha uuna difaacayaa xaquuqaha haweenka, carruurta, iyo dhalinyarada kasoo qaxay rabshadaha iyo colaadaha. Waxaan safar kutagnaa xarumaha qaxootiyaasha waxaana kala hadlaynaa qaxootiyaasha raadinta waxa ay u baahan yihiin. Waxaan sidoo kale la hadalnaa wakaaladaha UN ka iyo ururada maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah. Waxaan intaas kadib siinaa talooyin ururada caalamiga ah iyo kuwa wadaniga ah anagoo kala talina waxa ay tahay in la sameeyo si kor loogu qaado nolosha qaxootiyaasah iyo dadka kale ee ay soo bara kiciyeen colaada iyo masiibooyinka.

## Waxa aan ka samaynay Kenya

WRC waxay samaynaysaa mashruuc lagu raadinaayo rabshada galmada ee kadhanka ah ragga, wiilasha, iyo haweenka labeebshaha ah ee udhashay Koongo, Soomalia, iyo Koonfurta Suudaan kuwaasoo kunool Nairobi iyo Mombasa. Xadgudubka galmada waxaa kujiri kara dhaawac loo gaysto xubnaha taranka ama in qofka lagu qasbo inuu la galmoodo qof kale. Waxaa sidoo kale kujiri kara in qofka lagu qasbo daawashada qof kale oo xadgudub galmo lagu samaynaayo, ama ka iibsiga galmo ilmo yar. Dadka sameeya xadgudubka galmada (danbiilayaasha) badanaa waa niman, laakiin haweenka ayaa sidoo kale gaysta xadgudubka galmada. Bishii Abriil iyo Maayo 2019, cilmi baare katirsan WRC ayaa safar kutagay Nairobi iyo Mombasa macluumaad badana kasoo aruurshay arintaan. WRC waxay la kulantay 24 kooxaha diirada ah oo ay joogaan 149 qaxootiyaal ah waxayna la hadashay 40 shaqaalaha gurmadka ah iyo adeeg bixiyaasha. UNHCR (Wakaalada Qaxootiga ee UN ka) iyo HIAS, iyo sidoo kale hogaamiyaasha bulshada iyo turjumaano, ayaa naga caawiyay cilmi baarista.

## Natiijada aan soo helnay

Waxaad xaq uleedahay inaad ogaato natiijada kasoo baxday shaqadaan. WRC ayaa ogaatay in:

- Tiro badan oo ragga, haweenka, gabdhaha, iyo wiilasha qaxootiga ah ay la kulmeen xadgudubka galmada kahor, intay kujireen, iyo kadib markay soo galeen wadanka Kenya.
- Xadgudubka galmada ee lagula kaco ragga iyo wiilasha, si lamid ah xadgudubka galmada ee kadhanka ah haweenka iyo gabdhaha, ayaa u muuqda inuu kubadan yahay colaadaha kasocda Jamhuuriyada Dimuqraadiga ah ee Koongo iyo Koonfurto Suudaan. Dad badan ayaa loo gaystay xadgudub galmo kadib markii gurigooda lasoo weeraray iyo meelo lagu joojiyay intay jidka marayeen, ayagoo la xirxiray lana xabisay, iyo markay soo gaareen xaduudaha iyo isbaarooyin la dhigtay.
- Wadanka Somalia, ragga iyo wiilasha qaarkood ayaa la kulma xadgudubka galmada oo uga imaanaaya xubnaha qoyska iyo bulshada, xubnaha qabiilada kale, iyo kooxaha hubaysan, laakiin ma cada inay tahay wax marar badan dhaca.
- Rag badan oo qaniisiin ah iyo haweenka labeebshaha ah ayaa sheegay inay la dhibtoodeen xadgudub galmo oo loogu gaystay wadankooda iyo gudaha Kneya ayna kula kaceen xubnaha qoyskooda iyo bulshada, saraakiisha booliiska, iyo dadka kale.
- Gudaha Mombasa, sasabashada galmo ee wiilasha qaxootiyaasha ah iyo ragga da'yarta ah ayaa aad ubadan.
- Gudaha Nairobi iyo Mombada, qaxootiyaasha khatarta ugu jira halista sii kordhaysa ee xadgudubka galmada iyo sasabashada waxaa kujira ragga iyo wiilasha qaniisiinta ah, shaqsiyaadka labeebshaha ah, wiilasha iyo ragga da'yarta ah ee aan waalidkood la socon, qaxootiyaasha galmada ka ganacsada, iyo maxaabiista.
- Dadka la kulma xadgudubka galmada waxay badanaa qabaan baahiyo badan oo dhanka caafimaadka, dhimirka, iyo bulshada ah. Adeegyada qaar ayaa laga helaa gudaha Nairobi iyo Mombasa si loo caawiyo haweenka iyo ragga qaxootiyaasha ah, ayna kujiraan ragga iyo haweenka labeebshaha ah. Marka caawimaad iyo kaalmo lasiiyo, qaar badan oo kamid ah dadka loo gaysto xadgudubka galmada waxay awoodaan inay kasoo bogsoodaan ayna nolol buuxda oo caadi ah ku noolaadaan.
- Waxaa jiro caqabado kahor istaaga qaxootiyaasha helitaanka adeegyada. Tusaale ahaan, qaxootiyaasha qaarkood mahaystaan macluumaad kufilan oo la xariira adeegyada La heli karo. Waxaa laga yaabaa inaysan aqoon meesha nin, wiil, ama qof labeebshe ah oo loo gaystay xadgudub galmo uu uraadsan karo caawimaad. Adeeg bixiyaasha caafimaadka, shaqaalaha arimaha bulshada, iyo dadka kale ayaa laga yaabaa inaysan aqoon in ragga iyo wiilasha lagu beegsan karo xad gudubka noocaan ah, ama waxay si xushmad daro ah ula dhaqmi karaan dadka xad gudubka loo gaystay.

## Maxaa dhacaaya haddii falkaan anigga igu dhaco ama qof kale oon aqoono kudhaco?

Xadgudubka galmadu MARNA maaha khaladka dhibanaha. Gabi ahaanba waa khaladka qofka xad gudubka gaystay. Qofkasta ayaa lagu beegsan karaa xadgudubka galmada. Xadgudubka galmadu wuxuu leeyahay dhibaatooyin dhanka caafimaadka iyo dhimirka ah kuwaasoo la daawayn karo ama la maarayn karo.

Haddii adigga ama qof aad taqaano loo gaysto xadgudubka galmada uuna u baahan yahay taageero caafimaad iyo/ama caafimaadka Dhimirka

- Wac layn dedega ah ee booliiska haddii aad kujirto khatar degdeg ah: 999 ama 112.
- Wac laynka gurmadka qaranka ee xad gudubka galmada iyo jinsiga: 1195. Nambarkaan waa mid lacag la'aan ah wuuna shaqeeyaa 24 saacadood maalintii, todobo maalmood asbuucii.
- Gudaha Nairobi, wac laynka tooska ah ee MSF ee xadgudubka galmada iyo jinsiga: 0711 400 506.
- Tag isbitaalka kuugu dhaw si laguu siiyo daryeel caafimaad iyo mid dhimirka ah.
- Tag Isbitalaka Haweenka ee Nairobi (oo kuyaala Nairobi iyo Mombasa), Kenyatta National Hospital, Mama Lucy Kibaki Hospital, ama xarunta caafimaadka MSF oo kutaala Mathare. Xarumahaan waxay leeyihiin daryeel qaas u ah xad gudubka la xariira galmada iyo jinsiga. Waxaad heli kartaa 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii.

## Maxaa xiga?

Gudigga Qaxootiga Haweenka ayaa soo saaray warbixin balaaran oo la xarirta natiijooyinka iyo talooyinka kasoo baxay daraasadaan, "Waxaan Leenahay Qalbi Jabay": Rabshado Galmo oo kdhan ah Qaxootiyaasha kudhaqan Nairobi iyo Mombasa, Kenya. Warbixinta buuxda oo kuqoran Luuqada Ingiriiska iyo  xogta oo lasoo koobay oo kuqoran Ingiriis iyo Sawaaxili laga heli karo barta https://www.womensrefugeecommission.org/svproject.

WRC waxay la kaashanaysaa HIAS si ay u biloowdo mashruuc lagu taageeraayo buuxinta daloolka kajira bulshooyinka reer Kenya iyo bulshooyinka LGBTIQ (qaniisiinta ah).

## Macluumaadka Xiriirka

Dale Buscher,
Madax wayne Kuxigeenka, Barnaamijyada
Gudigga Qaxootiga Haweenka
Taleefanka: +1 212 551 3115
daleb@wrcommission.org

Dr. Sarah Chynoweth
Agaasimaha/Lataliyaha Mashruuca Xadgudubka galmada
Gudigga Qaxootiga Haweenka
Taleefanka: +1 212 551 3115
svproject@wrcommission.org

Dr. Vincent Were
Kenya Medical Research Institute
P.O. Box 1578-40101
Kisumu, Kenya
Taleefanka: +254 721 876 573
vwere@kemricdc.org

Oktoobar 2019